

Siyaasadda JLCB- Talaalka Ardayda

Ma jiro arday loo oggolaanayo in uu ka qaybgalo ama sii waddo ka qaybqaadashada dugsi kasta oo degmadan ku yaala asaga oo aan soo buuxin baahiyada qaanuuniga ah kuwaas oo ay kamid tahay talaalka looga hortagayo cudurka aan ka ahayn haddii uu ardaygu haysto cafis sharci ah oo caafimaadka la xariira, diin la xariira, arrimo shakhsi ah la xariira ama sababo kale oo shardi qaanuun ku xiran mooyaane.

Ardayda aan guddoon shahaado ku saabsan talaalka ama aan soo bandhigin cafis sharci ah waxaa laga joojin doonaa dugsigga iyo/ama waxaa laga cayrin doonaa dugsigga illaa laga helo shahaado cadaynaysa cafis.

Maamulka ayaa dejin doona heerar munaasab ah oo u hoggaansama qaanuunka.

Tababarka hadda ah waxaa lanidaamiyay 1993

Loo muraajaceeyay si loo waafijiyo habdhaqanka: taariikhda ansixinta buuga tusaalaha bixiya

TIXRAACA SHARCIGGA.: C.R.S. 22-33-106

C.R.S. 25-4-901 *et seq.*

6 CCR 1009-2

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO: JFC, Oggolaanshaha Ardayga/Iskaga tagida Dugsigga

JHD, Kareebida iyo Kacafinta Imaatinka Dugsigga

JKD/JKE, Dugsi Ka Joojinta Ardayga/Cayrinta

JRA, Daabacaadyada Ardayga

GOBOLKA COLORADO

John W. Hickenlooper, Guddoomiye Gobol
Christopher E. Urbina, MD, MPH
Agaasimaha Sare iyo Madaxa Masuulka Caafimaadka

U go'eey ilaalinta iyo horrumarinta caafimaadka iyo bay'adda dadka reer Colorado

4300 Cherry Creek Dr. S.
Denver, Colorado 80246-1530
Phone (303) 692-2000
Located in Glendale, Colorado

Laboratory Services Division
8100 Lowry Blvd.
Denver, Colorado 80230-6928
(303) 692-3090



Colorado Department
of Public Health
and Environment

<http://www.cdphe.state.co.us>

10 Janaayo, 2013

Gacaliye Waalidiinta Ardayda dhigata Iskuulada Colorado, Fasalada K ilaa iyo 12aad (Sanad Dugsiyeedka 2013-14),

Tallaalka waa qeyb muhiim ka ah daryeelka caafimaadka carruurteena, oo sharciga Colorado wuxuu leeyahay carruurta iskuulka aadda wa in la tallaalaasi looga hortaggo cudurada. Ulajeedada warqaddan waa in lagula soo socodsiiyo tallaalka loo **baahan yahay** soo xaadritaanka iskuulka iyo tallaalka lagula **tallinayo** ee aadka gacan uga geysta ka hortagga cudurada laga hortagi karo (eeg shaxanka ku qoran bogga labaad).

Adiga waalid ahaan, waxaa muhiim kuu ah in aad oggaato iyada oo ay u dheertahay tallaalka uu u **baahan yahay** Guddiga Caafimaadka ee Colorado si ardayda iskuulka u bilowdo, waxaa jira tallaalo ay ku **tallinayaan** Guddiga la Tallinta Howsha Tallaalka (ACIP). Halkan waa diiwaanka tallaalka ee ugu wanaagsan ee ubadkaaga ka dhowri kara cuduro ka hortag leh oo badan.

Waalidiinta badanaaba waxay leeyihiin welwel ama waxay u baahan yihiin macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ammaanka tallaalka iyo tallaalka carruurta. Illooyin loo diyaariyey waalidiinta oo ka hadlaya su'aalaha markasta la isweydiyo ee ku saabsan ammaanka iyo muhiimadda tallaalka waxaad ka heli kartaa: www.ImmunizeForGood.com . Bogga internetka ee Barnaamijka Tallaalka Colorado oo ku yaala: www.ColoradoImmunizations.com .

Iskuulada waxay aad ugu dadaalaan si ay u hubiyaan oo ayna addeecaan sharciyada tallaalka. Caawinaadda aad ku caawineyso in xafiiska diiwaangelinta iskuulka aad u keento diiwaangelinta tallaalka iyo goorta uu ubadkaaga la soo tallaalo waan kaaga mahadcelineynaa soo gudbinta macluumaadkaas. *Fadlan takhtar ama hay'adda caafimaadka dad-weynaha ee maxaliga ah kala hadal baahida tallaalka ubadkaaga. (Si aad u hesho waaxda caafimaadka dad-weynaha maxaliga halka lagala xiriiro Qatka Caafimaadka Qoyska ka waca 1-303-692-2229 ama 1-800-688-7777). Fadlan iskuulka horey ugu soo qaad warqaddaha tallaalka ubadkaaga ee lagu soo siiyo goorta ubadkaaga la tallaalo.*

Daacadnimo,

Barnaamijka Tallaalka Colorado

Waaxda Caafimaadka Bulshada iyo Bay'adda Colorado
303-692-2650

TIRADA UGU YAR EE CABIRKA LOO **BAAHAN YAHAY** SHAHAADADA TALLAALKA
Dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) ilaa iyo Fasalka 12, 2013-14 ayaa loo Baahan yahay Soo Xaadiriitaanka Iskuulka.

TALLAAL	Tirada Tallaalka	Fasalada K-12 (5-18 Sano Jir)
	Tallaalka la diro ≤ 4 maalmood ka hor da'da ugu yar waa jirtaa	
Qiix-dheer <i>DTaP kaliya ilaa 6 sano jir.</i>	5 ilaa 6	5 DTaP (haddii tallaalka 4 la durey dhalashada 4 ^{aad} ama wixii ka dambeeyey, shuruudaha waa laga soo baxey). Cirbadda ugu dambeysa ee DTAp waa in la duraa in aannan laga soo hormarin 4 sano jir. Tdap loo baahan yahay fasalada 6 ^{aad} ilaa iyo fasalka 12 ^{aad} .
Teetana/Gawracatada <i>DT kaliya shatiyaysan ilaa 6 sano jir.</i>	3 ilaa iyo 5	5 DT (haddii tallaalka 4 la durey dhalashada 4 ^{aad} ama wixii ka dambeeyey dhalashada 4 ^{aad} , shuruudaha waa laga soo baxey). Haddii ubadka jiro 7 sano jir ama ka weyn, waa in uu qaataa 3 teetano/gawracata oo ay ku tallaalka (DTaP, DT, Td, Tdap) – 4 todobaad udaxeyo cirbadda 1 & 2 iyo 6 bilod u dhaxeysa cirbadda 2 & 3
Dabayl (IPV)	3 ilaa iyo 4	5 IPV (haddii tallaalka 3 la durey dhalashada 4 ^{aad} ama wixii ka dambeeyey, shuruudaha waa laga soo baxey). Cirbadda ugu dambeysay waa in la darraa inta ka soo horeyn 4 sano jir.
Jadeecada/Qaamo-qashiir/Rubeela (MMR) <i>La soo jeediyay sanad dugsiyeedkan – 1 cirbid oo Rubeela ayaa la doonayaa.</i>	2	Cirbada 1aad lama duri karo in ka badan 4 maalmood ka hor dhalashada 1 ^{aad} . 2 cirbad ayaa loo baahan yahay fasalada K ilaa iyo 12 ^{aad} .
Busbuska (Bus-bus) <i>Dokumenti cudurka oo ka socda bixiyaha daryeelka caafimaad (takhtar, Kalkaalis (RN) ama Gargaarka Dad-weynaha (PA)) ayaa loo baahan yahay.</i>	1 ama 2	Cirbada 1 ^{aad} lama duri karo in ka badan 4 maalmood ka hor dhalashada 1 ^{aad} . 2 cirbad ayaa looga baahan yahay carruurta galeysa fasalka K ilaa iyo fasalka 6aad. 1 cir ayaa looga baahan yahay fasalka 7aad ilaa iyo fasalka 12 ^{aad} .
Beer xanuunka B <i>Ardayda aan qaadan 3 cirbad ee tallaalka Hep B 7/2/2009 ka hor waa in ay raacaan inta ugu yar ee loo dhaxeyyiyo ee ay ku talliyeen Guddiga la Tallinta Howsha Tallaalka (ACIP)</i>	3	Cirbadda labaad waa la tallaalka ugu yaraan 4 todobaad cirbaddii koowaad ka dib. Cirbadda sedexaad waa la tallaalka ugu yaraan 16 todobaad cirbaddii koowaad ka dib iyo ugu yaraan 8 todobaad cirbaddii labaad. Cirbaddii ugu dambeysa waa la duraa in aannan ka soo horeyn 24 todobaad (6 bilod) jir. 2 cirbad ee isku xig-xigta waa la oggolaan karaa kuwa ay da'doodu udhaxeeyso 11-15 sano jirka ah. 2 cirbad waxa kaliya la oggolaan karaa marka la isticmaalayo tallaalka la ansaxiyey ee 2-cirbid isku xig-xigga iyada oo ay la socoto dokumentiga (magaca tallaalka, cirbadda, taariikhda, iyo inta udhaxeysay).

TALLAALKA **LAGULA TALINAYO** EE DIFAACA UGU WNAAGSAN EE KA HORTAGGA CUDURADA

TALLAAL	Tirada Tallaalka	Fasalka K-12 (5-18 Sano Jir) Tallaalka la diro ≤ 4 maalmood ka hor da'da ugu yar waa jirtaa
Hargabka (Har-gab)	1 ilaa 2	2 cirbad marka koowaad haddii ka yar yahay 9 sano jir ugu yaraan iyada oo ay u dhaxeeyso 28 maalmood cirbaddiiba, ka dibna 1 cirbid sanadkiiba, wixii ka dambeeya. Waxaa lagula taliyaa carruurta 6 jirta iyo kuwa ka weyn.
Bararka xuub ee unugada xiriiriyaha maskaxda iyo xarigga laf-dhabarta ee Qoor-gooyaha (Meningococcal Meningitis) (MCV)	1 ilaa 2	Dhalinyarta 11-18 sano jir
Fayraska-babilloom a Dadka Dadka (HPV)	3	Dhalinyarta 11-18 sano jir
Beer xanuun A (Hep A)	2	Dhammaan carruurta 1 sano jirka iyo kuwa ka weyn

Tallaalka la iska DOONAAYO: Baaritaanka shaybaarka muujineysa badbaado la oggolaan karo.

Waa in aad mid ka mid ah kuwa soo socda keentaa ubadkaaga iskuulkiisa/eeda si sharciga loo addeeco.

- Shahaado dhameystiran ee caddeyneysa Tallaalka in ubadkaaga uu dhameystey tallaalka ugu yar ee la iska doonayo.
- Haddii ardayga Shahaadadiisa Tallaalka aannan la cusbooneysiin, waalidka/mas'uulka ama ardayga xuroobey wuxuu haystaa 14 maalmood ka dib marka uu helo ogeysiiska inuu keeno dokumentiga in tallalaalka la durey oo waa inuu soo gudbiyaa qorshe qoraal ah ee uu ku dhameystiraya tallaalka looga baahan yahay. Haddii qorshaha aannan la dhameystirin, ardayga waa in laga soo buriyaa ama laga joojiyaa iskuulka u hogaansanaan la'aan awgeed. Tan kaliya ardayga looga caginayo xeerkan waa haddii cirbadda tallaalka ay yar tahay.
- Bayaan ka Deynta Tallaalka - Waaxda Caafimaadka Bulshada iyo Bay'adda Colorado Shahaadada Tallaalka:
 - daawo** ka deynta oo soo saxiixey takhtar shatiyaysan oo ku sheegayo in ardayga xaaladdiisa jir ay tallaalka ku noqon karto mid halis gelinesa nolosha ama caafimaadka ama daawo ahaan aannan u wanaagsanayn; ama
 - diin ahaan** looga daayey kaas oo uu saxiixey waalidka, mas'uulka, ama ardayga xurka ah kaas oo ardayga uu addeecay diinta uu aaminsan yahay oo ka reebeysa tallaalka; ama
 - shaqsi** ahaan looga daayey kaas oo uu saxiixey waalidka, mas'uulka, ama ardayga xurka ah kaas oo ardayga uu addeecay diinta uu aaminsan yahay oo ka reebeysa tallaalka.

Shuruudaha tallaalka ardayda oo dhan ayaa sharciga lagu fulin doonaa. Ardayda aannan ka soo bixin shuruudaha waa loo diidi doonaa in ay xaadiraan sSida uu qabo Xeerka Dib-loo hagaajiyey ee Colorado 25-4-902.

Si aad u hesho tallaalka bilaash ah ama qimahiisa hooseeyo Qatka Caafimaadka Qoyska ka wac 303-692-2229 ama 1-800-688-7777